VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

Adeegyada Daryeelka Shakhsi Ahaaneed ee Caruurta (Children's Personal Care Services, CPCS) Isbadalada Barnaamijka ka jawaabida COVID-19

GUUDMAR

Caruurta u qalma CPCS maadaama oo ay u baahan yihiin taageero dheeraad ah oo hawlaha noloshooda maalintii ah (activities of daily living, ADLs). Xaalada degdegga ah ee caafimaadka shacabka ee uu keeney COVID-19 waxa uu ka dhigan yahay in qoysaska ayna ka heli karin taageero dheeraad ah bixiyaha banaanka maadaama oo ay korodhay khatarta lagu qaadayo coronavirus.

Si looga jawaabo caqabadahan dheeraadka ah, Hay'ada Vermont ee Adeegyada Binu Aadanku waxa ay u baahan tahay tanaasulka Xarumaha Medicaid iyo Medicare (Centers for Medicaid and Medicare, CMS) si ay ugu sahasho waalidka iyo xubnaha qoysaska caruurta qaba CPCS inay helaan lacag ay ku bixiyaan daryeelka shakhsi ahaaneed ee dheeraadka ah ee ay siinayaan. Kani waa isbadal wayn, laakiin ah mid ku meel gaadh ah xagga xeerka federaalka ee lagu maamulo CPCS.

SIDEE AYAY TAASI U SHAQAYNAYSAA?

Waalidka, ama daryeel-bixiyaha kale ee ay sheegeen qoyska ilmuhu, waxa ay heli karaan lacag bixin laba todobaadle ah oo ay ku bixiyaan daryeelka shakhsi ahaaneed ee dheeraadka ah ee ay siinayaan inta lagu jiro wakhtiga xaalada caafimaadka ee degdegga ah.

Xadiga lacagtu waxa ay ku salaysan tahay inta saacadood ee loo qoondeeyay CPCS todobaadkii, taas oo ah inta la bixiyo ee asalka u ah xadiga Medicaid ($13.74 saacadii). Qaabkani way ku kala duwan yihiin shirkadaha caadiyan isticmaala CPCS.

Waalidku waxa uu u gudbin doonaa qaansheeg ARIS Solutions labadii todobaad ee kasta taas oo ay ku qoran yihiin macluumaad aasaasi ah, sida magaca daryeelaha, xidhiidhka ka dhaxeeya ilmaha, taariikhdu inta ay u dhaxayso, iyo tirada saacadaha ee la bixiyay. Nuqul qaansheegta ah ayaa lagala soo degi karaa websaytka ARIS. Nuqulo ayay boosta ku diri doontaa ARIS, taas oo uu la socdo bushqada lagu soo celinayo oo lacagteeda lasii

bixiyay, wareega xiga ee warbixinta laba toddobaadlaha ah ee sida kharashka uu u baxay sidoo kale.

Lacagta waxaa laga bixin doonaa inta wakhtigan loo qoondeeyay CPCS ilmaha.

Ka tanaasulidani waxa uu dhaqangalay Maarso 15, 2020, Axadda ka horeysay amarka xidhitaanka dugsiyada Vermont. Taasi waxay ka dhigan tahay in waalidku ay soo gudbin karaan qaansheegta daryeelka dheeraadka ah ee ay heleen ilaa Maarso 15, 2020.

SU'AALAHA LA FILANAYO

Miyaan weli isticmaali karaa Shaqaale Daryeel Shakhsi Ahaaneed (Personal Care Attendants, PCAs) oo kale?

> Haa. Hadii qoysku uu doonayo inuu isticmaalo shaqaale kale oo PCA ah, tani waxa ay saamayn doontaa xadiga lacagta ah ee loo heli karo waalidka iyo daryeel-bixiyaha ee lagu heleyo ka tanaasulida kumeel gaadhka ah.

Imisa saacadood ayaan todobaadkii isticmaali karaa?

> Waalidka iyo daryeelayaash doorta inay qaataan lacagta usoo maraysa ka tanaasulida kumeel gaadhka ah kaliya waxa lagu siin karaa lacagta inta saacadood ee todobaadkii uu ilmahoodu hore ugu qalmi jiray.
>
> Laakiin, waalidku waxa ay dooran karaan in la siiyo saacado ka yar wadarta todobaadkii, si markaa ay lacagta ugu kaydsadaan shaqaale kale oo PCAs ah. Foomka qaansheegta ARIS waxa uu waalidka u sahlaa in uu ku muujiyo tirada saacadaha lacagtooda la siiyey, ilaa xadiga ilmahooda loo qoondeeyay todobaadkii.

Ma igu waajibaa in aan lacagahan uga warbixiyo cashuurahayga?

> Haa. Waalidka iyo xubnaha qoyska ee heli kara lacagaha CPCS COVID waxa siin doonta foomamka warbixinta cashuuraha ee daruuriga ah ARIS Solutions, mudo aan ka danbaynin Janaayo 31, 2021.

Mudo intee le'eg ayuu jirayaa ka tanaasulidani?

> Mudada lagu jiro xaalada degdegga ah ee caafimaadka dadwaynaha, sida ay bayaamisay Dawlada Federaalku.

Sidee ayay noqonaysaa hadii aanan weli uga duwaan gashanayn ARIS

Solutions Loo-shaqeeye ahaan?

> Lacagtahani maaha mid lagu helo shaqada. Laakiin, waraaqaha loogu baahan yahay ARIS iyo Gobolka, waa inaad buuxisaa "Foomka Xidhiidhka Waalidka-Ilmaha CPCS" iyo sidoo kale qaansheegta labadii todobaad.

Miyaan wakhti hore soo gudbin karaa qaansheegta?

> Maya. Shuruucda Medicaid waxay dhigayaan in lacag lagu bixin karo adeegyada hore loo qabtay oo kaliya.

Ma igu waajibaa in aan lacagahan ka warbixiyo hadii aan heli karo gunooyinka caymiska bilaa shaqada?

> Haa. In kasta oo lacagahani ayna ahayn qaab shaqo, Waaxda Shaqaalaha Vermont waxay u aragtaa inay yihiin mushahar oo waa in laga warbixiyaa marka la dalbanayo gunooyinka caymiska bilaa shaqada.

Miyaan soo gudbin karaa foomamka COVID si aan ugu bixiyo daryeelkayga shakhsi ahaaneed ee caadiga ah (PCA)?

> Maya. CPCS COVID lacagaha ah kaliya waxaa loogu talo galay waalidka iyo xubnaha qoyska caadiyan ay ka mamnuuc tahay inay mushahar ku qaataan adeegyada daryeelka shakhsi ahaaneed ee ay bixiyeen. PCA ay shaqaalaysiiyeen qoysku waxay sii wadi kartaa gudbinta xaashiyaha wakhtiga qaabkii caadiga ahaa.

ISBADALADA BARNAAMIJYADA KALE

> CPCS waxay balaadhinaysaa wixii caruurta loo qoondeeyay ee iminka ah heer todobaadle oo ay ka dhigaysaa 6 bilood. Waxa aanu kuu sheegi doonaa wakhti hore marka loo baahdo arjiyo kale.
>
> Hadii uu ku yimi isbadal baahida ilmahaaga ee adeegyada daryeelka shakhsi ahaaneed, in dib loo dalbado ayaa la isla eegi karaa iyadoo lagu samaynayo waxoogaa wax ka badal ah nidaamka arjiga. Arjiyada cusub ayaa sidoo kale wali la naqdinayaa.
>
> Fadlan ogow: wixii kormeer dheeraad ah ee loo baahan karo ee uu keeno xanuunka COVID-19, ma jidaynayo kalidii in isbadal lagu sameeyo baahida ilmaha ee CPCS.

VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

Fadlan la xidhiidh shaqaalaha barnaamijka CPCS hadii aad qabto wax su'aalo ah. Waxa aanu doonaynaa inaanu ogaano sida isbadalkani uu u saamayn karo qoyskaaga iyo sida aynu u waajafin karno xaaladaha qoyska ee gaarka ah.

MACLUUMADKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Adam Poulin, Maamulaha Barnaamijka 802-865-1395 adam.poulin@vermont.gov

Jessica Hill, Khabiirka CPCS 802-951-5169 jessica.hill@vermont.gov

Anne Bronson, Farsamo Yaqaanka CPCS 802-865-1311 anne.bronson@vermont.gov

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

ARIS Solutions – Waaxda Medicaid

DS/CPCS/FMR/CFC/

PDAC/Flex

Foomka Lacag Bixinta COVID ee ARIS – qaansheeg ayaa loo baahan yahay si lacagta loo helo

Foomka xidhiidhka waalidka/ilmaha ee ARIS – kaliya waxaa loo baahan yahay hadii qofka lacagta la siinayo aanu mar hore ARIS uga duwaan gashanayn loo shaqeeye ahaan

Wareega bixinta lacagta CPCS ee ARIS – waxay taxdaa taariikhda iyo wakhtiyada muhiimka ah

Dib loo sugay 5/5/2020

VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

Adeegyada Daryeelka Shakhsi Ahaaneed ee Caruurta (Children's Personal Care Services) – websaytka guud

AWAAMIRTA BUUXINTA FOOMAMKA ARIS:

Foomamka ARIS ee Bixinta COVID waa in la soo gudbiyaa usbuuciiba laba jeer wareeg kasta

> Soo gudbinta ugu horreysa, waalidiinta raba inay "la qabsadaan" laga bilaabo Maarso 15, 2020 taariikhda dhaqangalka ah waxaa ku jiri kara waqtiyo dhawr lacagood la bixinayo, laakiin kuwan waa in si cad loogu cadeeyaa foomka (sida 3/15/20 - 3/28/20, 3/29/20 - 4/11/20, iwm).
>
> Foomamka ku xiga waa inay qoraan oo keliya hal 2-toddobaad oo mushahar ah, **ma aha** toddobaaf kali ah ama qayb ah, ama maalmo keligood ah.

Foomamka Mushaharka ARIS ee COVID waxaa ku jiri kara hal (1) canug oo kaliya

> Qoysaska leh caruur badan oo qaata CPCS waa inay soo gudbiyaan foomam gooni ah, wareegii mushaharka, ilme kasta

Foomamka Mushaharka ee ARIS waxaa ku jiri kara oo keliya hal (1) lacag-bixin

> Markii waalidiinta kala duwan ay helayaan lacagaha (oo aysan ka badneyn qoondeynta toddobaadlaha ee cunugga), foomam gaar ah waa in la soo gudbiyaa

Foomka Waalidka / Cunugga ARIS waa in la soo gudbiyaa haddii qofka codsanaya lacag-bixinta uusan u aheyn loo shaqeeyaha Diiwaanka ku jira ee gunooyinka ilmaha ee CPCS.

> Looma baahna in la soo gudbiyo foomkan wareeg kasta oo mushaharka ka dib marka ay ARIS mid ka mid ah ugu jiro faylka loo-shaqeeyaha.

ARIS kaliya waxay bixin kartaa lacag-bixinta illaa xaddiga toddobaadlaha ah ee saacadaha CPCS ee loo arko inay caafimaad ahaan lagama maarmaan u tahay barnaamijka

Dib loo sugay 5/5/2020

VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

Markii foomamka la soo gudbiyo saacado ka badan halkii toddobaad ee ilmaha loo qoondeeyay, ARIS waxay wax ka beddeli doontaa codsigii la xiriiray saacadaha usbuuc kasta ee ay soo gudbiso CPCS.

Marka foomamka la soo gudbiyo oo codsanaya lacag ka badan wixii ka haray waqtiga oggolaanshaha hadda ee ilmaha, ARIS waxay bixin doontaa oo keliya inta harsan ee qoondaynta.

Buqshadaha soo celinta lacagta leh iyo koobiyada dheeraadka ah oo foomamka ah ayaa la heli karaa marka la codsado adigoo wacaya ARIS Solutions (1-800-798-1658)